

# Caawinta Teknoolajiyada ah e Ardayda

Aalada Tignooloojiyada Kaamaatiga ah (AT) waxay ka dhigan tahay sheey kasta, qayb kamid ah qalab ama softweerka, haddii ay tahay mid ganacsi, mid wax laga badelay, ama la naqshadeeyay, taasoo loo adeegsado kordhinta, joogtaynta, ama hormarinta awoodaha shaqada ee arday naafo ah.

AT ga shaqsigaa ah waxaa laga wadaa adeegyo kasta oo si toos ah uga caawiya ardayga naafada ah xulashada, iibsashada, ama adeegsiga aalada tignooloojiyada Kaalmaatiga ah. Adeegyada AT waxaa ku jira qiimeynta baahiyaha, isku dubaridka lala sameeyo baxnaaninada iyo adeegyada kale, xulashada iyo iibsashada aaladaha AT iyo tababarka ardayga iyo/ama haddii ay ku haboon tahay qoyska ardaygaas.

## Marka la tixgelinayo AT eeg:

- **Ardayga:** Eeg awoodaha, kartiyada, dookhyada, qaabka waxbarashada, dhiiri gelinta, iyo caqabadaha. Maxaa ka hortaagan ardayga inuu si madax banaan uga qaybgalo manhajka? Maxaa “ku haboon” ardaygaan?
- **Bii'ada:** Xagee baahidu ka jirtaa? Tixgeli fasalka, maqaayada, guriga, dalxiiska, iyo shaqada.
- **Shaqada:** Waa maxay yoolalka cunugayga? Shaqada ma loo sameeyn karaa si hufan isla qaabka ay u sameeyaan ilmaha faciis ah?
- **Tignooloojiyada:** Maxaa lagu gaari karaa shaqadaan? Tignooloojiyada ayaa xalin karta baahiyaha dhinacyada qoraalka, hadalka, akhriska, waxbarashada, xisaabta, dalxiiska iyo nasiinada, hawlaha nolol maalmeedka, aragga, maqalka, shaqada, dhinac u seexinta iyo fadhiga.
- **Xeeladaha:** Qeex meesha iyo qaabka tignooloojiyada loogu dari doono maalinta ardayga – nolosha. Go'aami nooca tababarka muhiimka u ah in ilmuhu gaaro guul. Taas ma jirtaan waalidiinta, macalimiinta, kaaliyaasha fasalka ama xirfadleyaasha kale?

## Sida Loo Aqoonsado Shaqooyinka

- Uruuri xog ku saabsan naafada ardayga.
- Aqoonso waxa ardaygu sameeyn karo ama uusan sameeyn karin marka loo eego ilmaha faciis ah ee aan naafada qabin.
- Ka fiirso heerarka waxbarashada iyo yoolalka ilmuhu ka shaqeynaayo.
- Abuur filashooyinka xaqiiqiga ah.

## Caawinta Teknoolajiyada ah ayaa ku jirta dhammaan Waxbarashada Gaarka ah

- Heerka hadda ee dedaalka
- Yoolalka iyo higsiyada
- Waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.
- Kaalmooyinka kabista ah iyo adeegyada

## Ma ogtahay?

- Malaayiin Ameerikaan ah oo qaba naafo ayaa adeegsada qalab gaar ah, kaalmooyinka, ama tignooloojiyada kaalmaatiga ah.
- Malaayiin Ameerikaan ah oo qaba naafooyin ayaa u baahan qalabka ama kaalmaatiga gaarka ah (AT) si ay u qabsadaan hawlaha aasaasiga ah ee nolol maalmeedka sida qubaysiga ama shaawar qaadashada, labiska, cunto cunista, gelista iyo ka dagashada sariirta ama kuraasta, socodka, ka bixida iyo adeegsiga musqusha (ayna ku jiraan gelista musqusha).
- Caawinta Teknoolajiyada ah ayaa noqon kara tignooloojiyad hoose (beesal qabtaha) iyo tignooloojiyada sareysa (ababka ku jira iPad-ka ama kumbuyuutarka).
- Masuuliyada tignooloojiyadu waa dedaal kooxeed. Tixgeli mustaqbalka oo ka shaqeysii yoolalka.

*Dookhyada iyo xogta ay bixinayso:*

*-www.p12.nysed.gov*

*-www.ncddr.org*

*Booqo parentnetworkwny.org si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.*